



(Qofka waysaqaata ee hagaajiya waysada, dambiyadiisu jirkiisa oo dhan bay ka baxayaan ilaa ay ciddiyaha hoostoodana ka baxaan)

Cusmaan Binu Cafaan-Allah ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Qofka waysaqaata ee hagaajiya waysada, dambiyadiisu jirkiisa oo dhan bay ka baxayaan ilaa ay ciddiyaha hoostoodana ka baxaan).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu sheegay in qofka wayso qaata isagoo ilaalinaaya sunadii iyo aadaabtii waysada arinkaasi wuxuu sabab u noqonayaa in loo dambi dhaafo, ilaa uu dambigu ka baxayo ciddiyaha gacmihiisa iyo kuwa lugahiisa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6263>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

